

**Sharci lamb 15 ee 23 Maay 1961
Abaabulka Faafinta Rasmiga ee dowladda Somaliya**

MADAXWEYNAHA KU MEEL GAARKA EE JAMHUURIYADDA

Kadib markii u garoowsaday oggolaanshaha Golaha Qaranka.

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga halkan ku qoran:

Qod. 1

Laga bilaabo 1 Luulyo 1960 waxaa la aabulay Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Somalia si loogu faafiyto shuruucda iyo dekreetoyinka dowladda.

Qod. 2

Waxaa u xil saaran soo saarista Faafinta Rasmiga Wasaaradda Caddaladda-Qaybta Arrimaha Guud ee Maamulka kaas oo keydin doono xeerarka asal ka ah.

Qod. 3

Dowladdu waxay awood u leedahay in ay soo saarto nidaam qeexaha is dubaridka iyo hirgelinta sharcigaan.

Qod. 4

Sharcigaan wuxuu hirgeli doona maalinta lagu soo faafiyto Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyada.

Sharcigaani waxaa lagu keydin doona Keydka Rasmiga ee shuruucda waxaan lau faafi doona Faafinta Rasmiga ah.

Waxaa la faraaya cid kasto in ay u hoggansanaadaan sharcigaan cid kastana ay u hoggamiyaan.

Muqdisho, 23 Maay 1961.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha
Abdirashid Cali Shermarke

Wasiirka Cadalaadda & Garsoorka
Mohamud Ahmed Mohamed